Hambalyo
ilmaha idiin dhashay

Tillykke med jeres barn

Somalisk

www.sundhedstjenesten-egedal.dk

Ku soo dhawaada khidmada caafimaadka Egedal

Waxaa heali kartaa khidmada ah, inuu idin soo booqdo kormeeraha caafimaad laga bilaabo marka ilmaha uu dhasho ilaa uu ka gaaro qiyaastii 8½ bilood.

Khidmadan waa waa lacag la'aan, khasabna ma aha.

Kormeeraha caafimaad wuxuu idin siinayaa waan iyo la talin la xidhiidha barbaarinta ilmaha iyo caafimaadka qoyska.

Booqashada

Booqashada waxay u dhacdaa sidan:

1. booqasho: Booqashada ugu horaysa 7 bari ka dib dhalashada ilmah
2. booqasho: 1-2 usbuuc ka dib booqashada 1.aad
3. booqasho: Marka uu ilmaha gaadho 7-9 usbuuc
4. booqasho: Marka uu ilmaha gaadho 4-4 1/2 bilood
5. booqasho: Marka uu ilmaha gaadho 8½ bilood

Way fiican tahay in aad sii diyaarsato su'aalaha qabo, taasi waxay suurtagal inoogi dhigi inaaj kawada hadlno su'aalaha inta booqashadu socoto.

Kormeeraha caafimaad ayaa qiimaynaya baahida ah in loo baahan yahay, booqasho dheeri ah.

Booqashada ugu danbayso ka dib, waxaad weli ku xidhnaanaysaan khidmada caafimaadka, ilaa uu ilmahu ka gaadho 16 jir, hadaad u baahataana khidmada caafimaadka waxaad kala soo xiriiri kartaan tlf. 7259 6720

Marka xanuun yimaado

Maadaama kormeeraha caafimaad uu booqanayo qoysas bada, waa muhiim inaad soo wargelisaan hadii xanuun yimaado, si aad u joojisaan booqashada.

Wada xiriirka/talobixinta

Kormeerihiina caafimaada waxaad kula xiriiri kartaan taleefan ama e-mailka ku qoran kaarka ay idin siiso booqashada ugu horaysa.

Shaqaalaha khidmada caafimaadka waxaa lagula xiriiri karaa tlf. nr. 7259 6720 isniinta ilaa khamiista inta u dhaxaysa saacadaha 8-14 ama bogan sundhedstjenesten@egekom.dk

Hogaanka kormeerida caafimaad waxaa lagala xiriiri karaa tlf. nr. 7259 6734 ama e-mailkan nina.rasch@egekom.dk

Hadii ay shaqayn wayda wadashaqaynta kormeeraha caafimaad, waxaa lala soo xiriiri karaa hogaanka kormeerida caafimaad.

Dhalshada ka dib

Marka uu ilmihiinu gaadho qiyaastii . 7-9 usbuuc, waxaa la idinku samaynayaa baadhitaan guud oo ku saabsan haduu jiro is badel dhalidii ka dib, jawaabta soo baxdana waxaad isl meel dhigaysaan kormeeraha caafimaad.

Hadii ay jirto baahi ah in hooyooyinka koox ahaan loo baaro. Aabayaasha waxaa lala samaynayaa wadahadal reerka isqaba

Waalidka caruurta waxaa loo qabtaa koorso

PREPWaxaa loo qabtaa koorso 2 maalin ah, waalidka wada nool ee caruur haysta, degana Kamuunka Egedal
Koorsada waa barnaamij ka kooban warbixin la idin siinayo, iyo wadahadal la idinla samaynayo, kaasoo idinka caawinaya xaga wadahadalka

Waxaa la iska diiwaan gelin karaa halkan
sundhedstjenesten@egekom.dk

Waa ayo kormeere caafimaad

Kormere caafimaad waxa uu leeyahay waxbarshada kalkaalinta caafimaad, wuxuuna khibrad u leeyahay xga caruurta, waxaa uu waxbarsho dheer 1,5 sanno, oo uu la xidhiidha dhalaanka, dhalinta iyo qoysaska.

Kormeeraha caafimaad inta badan waxa uu ka shaqeeya iskuulada degmada, wuxuu kaloo la shaqeeyaa caruurta yaryar. Kormeeraha caafimaad sidoo kale waa talobixiya ka shaqeeya xarumaha caruurta.

Kormeeraha caafimaad wuxuu wadshaqayn la leyahay macalimiinta iskuulka, dhakhaatiirta , saaykalojiistaha, talobixiyaasha kamuunka, macalimiinta hadalka iyo xirfadlay kale ee la shaqeeya qoyska.

Joornaalka elektarooniga ah

Kormeeraha caafimaad waxaa saaran waajika ah, inuu ilaaliya sirta qoyska, Waxaad arki kartaan inuu ku diiwaan galiyo joornaal, uu ka qor cabirada uu qaado iyo balamah uu idinla leeyahay booqashada xigta. Waxaad ka rki kartaa warbixinadan bogan www.sundhedsvejen.dk

Waxaad ku gali kartaa Nem ID.

Bogga khidmada caafimaadka

Bogga khidmada caafimaadka www.sundhedstjenesten-egedal.dk waxad ka heli kartaan buugaagta yaryar ee ay ku qoran yihiin, ee kormeeraha caafimaad idiin sheego, sidoo kale waxaad ka heli kartan waxyaabo kale oo faa'iido idiin leh.

Halkan sidoo kale waxaad ka heli kartaan, liistada cinwaanada aad kala xiriiri kartaan kormeerayaasha caafimaad oo dhan.

Soo bandhigid warbixin furan

Khidmada caafimaadka waxay qabtaan warbixin furan 14 bariba mar, waxayna ku qabtaan 6 meelood oo ka tirsan kamuunka.

Halkan waxaad kula kulmi kartaan waalidiin kale oo cusub, iyo waxaad suurtagal idiin noqonaya inaad ogaataan wax badan o saabsan barbaarinta ilmaha iyo walwalka aad qabtaan, oo aad kala hadli kartaan kormeeraha caafimaad. Sidoo kale waxaa lagu soo bandhigayaa barnaamij ku saabsan mawduuc caafimaad ah, kaasoo aad ka arki kartaan boggaanaga internet-kaHadii aad is diiwaan galisaanHvis I tilmelder jer *"waxaad kala socon kartaa wixii isbedel aha boggan"* wrbixin furan hoosteeda ee boggaanaga, Waxaad helaysaan fariin hadii barnaamijka isbedel ku yimaado.



Dadka loogu talagalay

Kormeeraha caafimaad ayaa qoondaynaya dadka lagu casuumaya barnaamijka marka ugu horaysa, ka dib dadka ka soo qayb gala ayaga qorshayn doona barnaamijka xiga goorta iyo goobta lagu qabanayo.